




## 1. 15 daqiiqo kahor balantaada daawaynta taleefanka, guji linkiga laguugu soo diray iimeelka ama fariinta qoraalka ah.

- Kaliya 1 ruux ayaa ku xidhmi kara oo booqanaya isaga oo adeegsanaya linkigan. Bixiyuhu waxa uu ku casumi karaa qof kale marka booqashadu bilaabanto.




## 2. Hadii aanad lasoo degin app-ka, guji Download App oo raac tilmaamaha lasoo degida.


- Hadii aad hore ulasoo degtay app-ka, guji Open App.
- Waxaa dhaanta in la isticmaalo app, laakiin waxa aad dooran kartaa inaad kusii Wadato Barowsarka oo aad isticmaasho Google Chrome hadii loo baahdo.




## Downloading the App





**Guji badhanka  
Download App.**



**Faylku waxa uu  
kusoo deji doonaa  
kombuyuutarkaaga.  
Guji falka ku yaal  
xaga hoose ee bidix  
ee daaqada si aad u  
dhamaystirto ku  
shubida.**



**Kadib marka aad ku  
shubto app-ka, ku  
noqo qoraalkaagii  
ama iimeelkaagii oo  
guji linkiga balanta.**




**Waxa aad furan  
kartaa shaashadan.  
Guji Open Teladoc  
Health Patient ama  
Open App.**

## 3. Guji Check In.




## 4. Akhri macluumaadka ilmahaaga oo guji Confirm.




## 5. App-ku waxa uu tijaabin doonaa internetkaaga, iyo kameeradaada. Waxa aad iska arki doontaa shaashada.

- Isticmaal muujinta soo furanta si aad u badasho kameeradaada ama mikrifoonkaaga hadii loo baahdo.
- Guji Proceed marka aad ugu dhamayso tijaabada.



6. Waxa aad geli doontaa qaybta aad ku sugayso. Bixiyaha ayaa ku soo biiri doona markaa booqashadaada kadib marka uu eego macluumaadkaaga.



- HA laabin ama ka tegin app-ka ilaa inta booqashadu dhamaanayso.



## TILMAAMAHA SOO HADALKA

### •Kameerada iyo Mikrafoonka

- Xaqiiji in kameeradaada iyo mikrifoonkaagu shidan yahay. Guji badhanka si aad u shido oo aad u bakhtiiso.




- Guji badhanka Setting si aad u badasho kameeradaada ama mikrifoonkaaga.




- Waxa aad u diri kartaa fariin sheekeysii bixiyahaaga wakhtiga booqashada. Guji badhanka Chat si aad u furato wada sheekeysiga.

- Qoro fariintaada iyo gurji Send.



- Si aad usoo dhamayso, guji badhanka End Call.

- Hadii aad xidho taleefanka kahor inta aanad dhamaynin, waxa aad gujin kartaa linkiga iimeelkaaga ama fariinta qoraalka ah oo mar kale gal. Tani waxay kaliya shaqaysaa 5 daqiiqo gudaheed marka ay booqashadu dhamaato.



## Cilad saarida


- Waxa i haysata mushkilad kameerada am mikrifoonka ah.

Hadii aad isticmaalayso app-ka, waxa aad raacdaa tilmaamaha si aad u gasho ogolaanshaha buuxinta kameerada.


1. Guji badhanka Windows ee xaga hoose ee shaashaadaada ku yaal.




2. Guji Settings



### 3. Baadh "Camera" oo guji Camera privacy settings.




### 4. Xaqiiji in aad SHIDO qaybta Allow apps si ay uu galo kameeradaada




Hadii aad isticmaasho Google Chrome, raac tilmaamaha si aad u gasho buuxinta ogolaanshaha kameerada.


### 1. Guji 3 dhibcood ee muujinta ee dhanka midig kaga yaala daaqada borowsarka Chrome.




### 2. Guji Settings.



### 3. Guji Privacy and security ee muujinta dhanka bidix ee shaashadaada.




### 4. Guji falaadha ku xidhta Site Settings.




### 5. Hel halka ay ku taalo "patient.visitnow.org" oo guji falaadha midig.

- Waxa aad kuu soo bixi karta "visitnow.org"




### 6. Xaqiiji inaad Camera iyo Microphone ay yihiin Allow. Hadii aanad ka dhigin, ka dooro Allow muujinta hoos usoo furmaysa.



### o Ma heli karo linkiga booqashadayda.

- Linkiga waxaa loo diray iimeelkaaga iyo taleefankaaga dhawr jeer kahor wakhtiga booqashadaada.
  - o 24 saacadood kahor
  - o 15 daqiiqo kahor

- Kaliya 1 ruux ayaa ku xidhmi kara oo booqanaya isaga oo adeegsanaya linkigan. Bixiyuhu waxa uu ku casumi karaa qof kale marka booqashadu bilaabanto.
- Baadh "Visitnow" fariintaada ama iimeelkaaga
  - Waxaad ka eegtaa fooldharada Junk ama Spam



Wixii taageero farsamo ah, la hadal (816) 302-7895

Si aad balan kale u qabsato, la hadal (816) 234-3700